



Farriin Qoraaleed

Ku socoto: Shurakada daryeelka caafimaadka iyo caafimaadka dawaynaha

Ka socoto: Maamulka Caafimaadka Oregon

Taariikhda: Janaayo 5, 2021

Mawduuca: Warbixinta Taxanka Wajiga 1a ee COVID-19

Waxaanu bixinaynaa warbixn ku saabsan [Qorshaha Taxanka Tallaalka Wajiga 1a ee Oregon](#) kaasi oo la daabacay 18-ka Diisambar, 2020. Qorshaha Wajiga 1a ee Oregon wuxuu waafaqsan yahay laakiin ka baaxad wayn yahay talobixinaha Guddiga La-talinta ee Habdhaqanka Tallaalka (Advisory Committee on Immunization Practice, ACIP) ee wajiga hore ee qaybinta tallaalka COVID-19. Ku-talogalka hore ee Qorshuhu wuxuu ahaa in marxalado laga dhigo qaybinta iyo bixinta tallaalka si loo fududeeyo arrimaha gaynta meelaha loogu talagalay looguna xisaabtamo arrimaha sinnaanta, shakhsiga, bii'adda, iyo hawsha kuwaasi oo soo jeedinaya halista sii kordhaysa ee qaadista fayraska ama faafinta fayraska ama la kulmida cawaaqibta caafimaad ee halista ah ee fayrasku keeno.

Anagoo mudnaantayada koowaad ka dhigayno sinnaanta marka aan tixgalinayna caqabadaha hawlgalada gaarsiinta tallaalka COVID-19 meelaha loogu talagalay, **waxaanu ka leexinaynaa jidadayada ubaahnida taxanka tallaalka Wajiga 1a, waxaana u leexinaynaa oggolaanshaha in cid kasta oo ku jirta Wajiga 1a, Kooxaha 1-4 loo tixgaliyo inay mutaysteen tallaalka wakhtigan. Bixiyayaasha iyo goobaha tallaalku waa inay tallaalka u bixiyaan qaab saamaxaya wxtarka ugu wayn si looga faa'idaysto tallaalkada, hase yeeshee, ilaa iyo intii suurtoagal ah bixiyayaashu waa inay raacaan taxanka lagu sharaxay Qorshaha.**

Si ay sare ugu qaado dadaalada talaalka, OHA waxay isticmaalaysaa nidaamyada jira ee loo diyaariyey hawlgalada tallaalka, sida isbitaalada, nidaamyada caafimaadka, hay'adaha EMS iyo maamulada caafimaadka dadwaynaha ee deegaanka. OHA waxay ku dhiirgalinaysaa shurakadan gaarsiinta tallaalka in ay sii wadaan wada shaqaynta si ay u tallaalaan shakhiysaadka kujira Wajiga 1a.

Barnaamijka iskaashiga farmasiyada fadaraalku wuxuu sii wadi doonaa inuu u adeego qaar badan oo ah xarumaha daryeelka muddada dheer iyo daryeelka kooxda ee ku jira kooxaha Wajiga 1a. Saraakiisha gobolku si firfircoon ayey dib ugu eegayaan liiska xarumaha kaqaybqaadanaya barnaamijka tallaalka fadaraalka. Gobolku wali wuxuu ka shaqaynaya qiimaynta sida loo taageerayo bixiyayaasha aan mutaysan ama aan iska diiwaangalin barnaamijka. Gobolku wuxuu haysan doonaa liis ah xarumaha daryeelka kooxaha (tusaale, guryaha xannaanaynta muddakarka ee dadka waayeeelka ah, muddakarka qaba naafooyin,

muddakarka waajahaya dhibaatooyinka caafimaadka habdhaqanka, iyo dadka qaba naafooyinka garasho iyo kuwa koboceed, iyo sidoo kale guryaha daryeelka kooxaha ee dadka qaba naafooyinka garasho iyo kuwa koboceed iyo guryaha iyo xarumaha la deggan yahay ee daawaynta caafimaadka habdhaqanka) ee u baahan in laga caawiyo tallaalka oo lagala shaqeeyo istaraatiijiyadaha gobolka ee goobahan.

Shakhsiyaadka aan ku xirnayn mid kamid ah goobaha daryeelka dadka badan ee Wajiga 1a ama isbitaal, nidaam caafimaad oo wayn ama loo-shaqeeye, OHA iyo shurakada goboleed ayaa waxay ka shaqeynayaan inay soo gunaanadaan oo ay soo sheegaan xulashooyinka helitaanka tallaalka ee shakhsiyaadkan. Xulashooyinkan ayaa la baahin doonaa isla marka faahfaahin dheeraad ah la helo. Haddii, intaa kahor, Maamulka Caafimaadka Dadwaynaha Deegaanka iyo/ama shurkadiisu ay hayaan daawo iyo khayraad ku filan si loo bilaabo tallaalka shaqaalaha iyo degganayaasha xarunta daryeelka dadka badan taasi **oon ka diiwaangashanayn** barnaamijka iskaashiga farsmasyada fadaraalka, LPHA iyo/ama shurkadeedu waxay bilaabi karaan tallaalkadan.

Si ka madaxbannaan qaybta Wajiga 1a, qoondaynaha goobaha tallaalku waxay noqon qaar ka duwan qoondaynihii bilawga marka goobo tallaalka oo kale la diiwaangaliyo. OHA waxay ka shaqayn doontaa xaqiijinta in qoondaynaha tallaalku u taageerayaan hawl-galada tallaalka ee bulshooyinka si waafaqsan taxanka Kooxda 1-4 ilaa intii suurtoagal ah.

OHA waxay daabici doontaa macluumaad dheeraad ah oo la xiriira tallaalka COVID-19 ugu dambayn Jimcaha, 8-da Janaayo kaasi oo la xiriira qaybinta iyo bixinta tallaalka Wajiga 1a. OHA sidoo kale waxay daabici doontaa warbixino marka shakhsiyaad aan ahayn kuwa ku jira Kooxaha 1 ilaa 4 ee Wajiga 1a ay mutaystaan helitaanka tallaalka.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo la xiriira tallaalka COVID-19 intaas kahor, fadlan ku soo dir su'aalahaaga mid ka mid ah kuwa xiggo si markaas OHA kuu caawiso.

Tallaalka guud ee COVID-19: ORCOVID@211info.org

Diiwaangelinta bixiyaha tallaalka COVID-19: Vaccine.ProviderEnroll@dhsosha.state.or.us

Guddiga la-talinta ee tallaalka COVID-19: Covid.vaccineadvisory@dhsosha.state.or.us

Khayraadyo ayaa laga heli karaa Websaytka Tallaalka COVID-19 ee OHA:
<http://healthoregon.org/covidvaccine>